



Shardiga Shaqada Dadka Waaweyn 18 Sanno Ilaa 49 Sanno THE WORK REQUIREMENT FOR ADULTS AGES 18 THROUGH 49

Waa maxay shuruudaha looga baahanyahay dadka waaweyn ee da'aha 18 ilaa 49?

Waa shuruud federaal ah oo kamida xubnaha FoodShare looga baahanyahay si ay u sii wataan manfacyada FoodShare. Waxayqusaysaa dadka waaweyn ee da'aha 18 sanno ilaa 49 ku waas oo aan lahayn carruur da'doodu ka hoosayso 18 oo ku noolguryohooda iyo kuwo aan haysan ka dhaafitaanka.

Sidee ayaan ugu soo bixi karaa shardiga shaqada?

Waxaa jira saddax siyaabo oo looga soo baxo shardiga shaqada:

1. In aad shaqeysid ugu yaraan 80 saac bil kasta.
2. In aad ka qeybgashid barnaamijka shaqada ee la ogol yahay ugu yaraan 80 saac bil kasta, sida:
 - FoodShare Shaqada iyo Tababarka (Employment and Training) (FSET).
 - Wisconsin Works (W-2).
 - Barnaamijyada qaar ee hoos timaada sharciga Workforce Innovation and Opportunity Act (WIOA).
3. Shaqada iyo ka qeybqaadashada barnaamijka shaqada la ogol yahay labada ugu yaraan iskudarka 80 saac bil kasta.

Haddii aan ahay qof weyn kaas oo u baahan buuxinta shuruudaha shaqada, Goorma ayaa la iiga baahanyahay inaan bilabbo in aan ka soo baxo?

Waxa lagaga baahanyahay inaad bilawdo shuruuda shaqada bisha ugu horaysa oo buuxda markaad hesho manfacyada FoodShare. Marka codsiga FoodShare la ansixiyo, qof kasta oo ku jira codsiga kaas oo u baahan inuu buuxiyo shuruudaha shaqadu waxa loo gudbiyaa barnaamijka FSET.

Yey yahiin dadka da'dooda u dhexeyso 18 sanno ilaa 49 sanno ee laga dhaafay shardiga shaqada?

Waxaa dhici karto inuu ka xor ahaado kaddibna aadan u baahanin in aad la kullantid shardiga shaqada haddii mid ka mid ah kuwa soo socda uu yahay run:

- Aad la nooshahay cunug ka yar 18 sanno, oo ka tirsan reerka qaata FoodShare.
- Aad tahay daryeelaha koowaad ee qofka aan naftiisa ama naftiisa daryeeli karin.
- Aad tahay daryeelaha koowaad cunug kugu tiirsan oo ka yar 6 sanno.
- Jir ahaan iyo maskax ahaan, awood uma lihid in aad shaqeysid. Tani waxa ku jirta ahaanshaha qof aan hoy lahayn muddo dheer. Ahaanshaha qof aan hoy lahayn muddo dheer macnaheedu waa weeye ma haysan doontid meel caadi ah oo aad joogto 30 habeen ee soo socda.
- Waxaad qaadataa ama waxaad dalbatay ceymiska shaqo la'aanta.
- Waxaad ka qeyb qaadataa barnaamijka daweynta iyo dib u dejinta (AODA) ku xadgudubka qamrada ama mukhaadaraadka kale.
- Waxaad ku qoran tahay hay'ad laga barto aqoonta sare ugu yaraan bar ka bar waqtiga.
- Waxaad tahay da'da 18 sanno ama ka badan, waxaad tagtaa dugsiga sare ugu yaraan bar ka bar waqtiga.
- Aad ka diiwaangashantahay W-2 oo aad u hogaansameysid sharuudaha W-2.
- Aad shaqeyneysid 30 saacadood ama ka badan isbuucii ama aad heleysid mushaaraha la midka ah 30 saacadood ama ka badan isbuucii ee mushaarka ugu yar faderaalka.
- Waxaad ku nooshahay meel laga daayey shuruudaha ceymiska shaqa-la'aanta ama waxaad tahay xubin ka mid ah qabiillada dadkii asalka Mareykanka ama qof ku nool dhul qabiileed ama seere laga daayey

ceymiska shaqa la'aanta. Si aad u aragto liiska meelaha, dhul qabiileedka ama seeraha laga daayey ceymiska shaqa la'aanta, booqo <https://www.dhs.wisconsin.gov/fset/exemption.s.htm>.

Xasuus: Waxaa dhici karto in lagaa dalbado in aad bixisid caddeyn in aad haysato ka-dhaafidda.

Maxaa dhaca haddii aan la kulmin shardiga shaqada?

Haddii aad u baahan tahay in aad la kullantid shardiga shaqada kaddibna aadan la kulmin, waxa laga yaabaa in laguugu xaddido manaafacaadka FoodShare saddax bil ee muddo 36 bil (saddex-sanno). Si aad u sii qaadatid manaafacaadka FoodShare saddaxda bil kaddib, waa in aad la kullantid shardiga shaqada, aad haysato dhaafid ama sugtid muddo 36 bil.

Sidee ayaan ku helaa kaalmo si aan ula kulmo shardiga shaqada?

Waxaa laguugu diri doonaa barnaamijka FSET marka aad dib u cusboneysiisid ama aad dalbatid

manaafacaadka FoodShare haddii aad u baahan tahay in aad la kullantid shardiga shaqada iyo aadan horay u shaqeynin ama aadan ka qeybgelin barnaamijka shaqada ugu yaraan 80 saac bil kaasta, ama iskudarka labadaba.

FSET waxay kugu kaalmeyn kartaa in aad la kullantid shardiga shaqada. FSET waxay bixisaa adeegyo lacag la'aan ah si laguugu kaalmeeyo in aad yeelatid xirfadaha shaqada iyo si aad u heshid shaqo.

Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan barnaamijka FoodShare ama FSET:

- Booqo <https://www.dhs.wisconsin.gov/foodshare/index.htm>
- La xariir wakaaladda deegaankaada.

Si aad u heshid wakaaladaada, tag <https://www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/resources.htm>, fiiri bogga 2aad warqadaan xaqiiqada, ama wac Adeegyada Xubinta, telefoonka 800-362-3002 (waxaa la helaa TTY iyo adeegyada tarjamada).

Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salaysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidhi si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafada ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) **boostada:**
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) **fakiska:**
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.